*Hindise-Sharciyeed loogu talogaley Sharci magaciisu yahay*

# SHARCIGA HANTI-DHOWRKA DOWLAD-GOBOLEEDKA EE 2016KA

**EE Dhaqangaley ____ 2016**

ORIGINAL

## SHARCIGA HANTIDHOWRKA DOWLAD-GOBOLEEDKA

## DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

**QAABKA AY U HABEYSAN YIHIIN QAYBAHA SHARCIGAN**

**QAYBTA I:**

**QODOBBO GUUD**

**QAYBTA** **BOGGA**


Q1aad: Cinwaan Gaaban .......... 05
Q2aad: Hadafka Sharciga .......... 05
Q3aad: Fasiraad .......... 05-08


**QAYBTA II:**

**XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD IYO HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA**


Q1aad: Abuurista Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka .......... 08
Q2aad: Magacaabista Hantidhowrka Guud .......... 08-09
Q3aad: Hawlaha Hantidhowrka Guud .......... 09-10
Q4aad: Madax-bannaanida Hantidhowrka Guud .......... 10-11
Q5aad: Xeer-hoosaadyada .......... 11
Q6aad: Shuruudaha Shaqada Hantidhowrka Guud .......... 11
Q7aad: Muddada Xilka .......... 11
Q8aad: Is-casilaadda Hantidhowrka Guud .......... 11
Q9aad: Xil-ka-qaadista Hantidhowrka Guud .......... 12
Q10aad: Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud .......... 12-13


**QAYBTA III: MAAMULKA, SHAQAALAHA IYO DADKA KALE EE LOO MAGACAABAYO XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA**


Q1aad: Magacaabista Shaqaalaha .......... 13
Q2aad: Maqaamka Shaqaalaha .......... 13
Q3aad: Dalacsiinta Shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud .......... 13
Q4aad: Xaaladda Shaqada iyo Arrimo Kale oo La Xiriira Shaqaalaha .......... 13
Q5aad: Ka-dhaafidda Shuruucda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda .......... 14
Q6aad: Shaqaaleysashada Qandaraaslayaal .......... 14
Q7aad: Qandaraasyada lala gelayo Sharikaadka Xisaabaadka .......... 14
Q8aad: Dhabbe-tuseyaasha Qandaraas-bixinta .......... 14
Q9aad: Waajibaadyada iyo Shuruudaha laga doonayoa Qandaraaslayaasha .......... 15
Q10aad: Muddada ay jirayaan Qandaraasyada La Siinayo Sharikaadka Xisaabaadka .......... 15
Q11aad: Adeegyada Aan Loo Oggoleyn in ay Bixiyaan Sharikaadka Xisaabaadka .......... 15


ORIGINAL

Q12aad: Awoodda La Siinayo Sharikaadka Xisaabaadka ........................................................................................ 15
Q13aad: Soo-celinta kharashaadka ku baxay adeegyada cid kale qandaraas lagu siiyey ................................................. 15
Q14aad: Ujuurooyin uu qaado Hantidhowrka Guud si uu u helo kharashka ku baxa hawshiisa ............................................... 16

## QAYBTA IV: HANTIDHOWR KU-SAMEYN IYO KA-SOO-WARBIXIN

Q1aad: Hantidhowr ku-sameynta hay'adaha dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya .......................... 16-17
Q2aad: Baarista Khayaannooyinka ........................................................................................................................ 17
Q3aad: Warbixinno Sanadeed .............................................................................................................................. 17-18
Q4aad: Warbixinno Gaar ah ................................................................................................................................ 18
Q5aad: U-gudbinta Warbixinnada ee Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka ........................................................ 18
Q6aad: U gudbinta Warbixinnada Hantidhorka ee Baarlamaanka Dowlad-goboleedka ........................................................... 18
Q7aad: Soo-bandhigiddaWarbixinnada oo ah Dokumentiyo Ay Dadweynuhu Heli Karaan.................................................. 18-19
Q8aad: Dib-u-eegista uu Guddiga Xisaabaadka Dowladda uu ku sameeyo Dhammaan Warbixinnada Hantidhowrka ............... 19
Q9aad: Jaangooyooyinka Hantidhowrka ..................................................................................................................... 19
Q10aad: Helidda Dadka, Dokumentiyada iyo Gelidda Dhismayaasha ay u baahdaan ................................................................ 20
Q11aad: Waajibaadka Saaran Hay'adaha Dowladda ee ah in ay Bixiyaan Macluumaadka Looga Baahdo ................................. 20
Q12aad: Helidda Warbixinnada Hantidhowrka Gudaha ...................................................................................................... 20
Q13aad: Awoodo Macluumaad-Ururin ............................................................................................................................ 20-21
Q14aad: Helidda Xisaabaadka, Macluumaadka, Lacagta iyo Hantida ..................................................................................... 21
Q15aad: Waajibka ah Bixinta Macluumaadka ayaa ka weyn Waajibaadyada iyo Xuquuqaha Kale .......................................... . 21
Q16aad: Wargaarsiinta Wasiirka .................................................................................................................................. 22
Q17aad: Jawaabaha laga soo bixiyo Warbixinnada Qabyada ah ............................................................................................ 22
Q18aad: Shaac-ka-qaadista Macluumaadka ..................................................................................................................... 22

## QAYBTA V: MAALIYADAHA IYO KHARASHAADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

Q1aad: Maaliyadaha Xafiiska Hantidhowrka Guud ............................................................................................................ 23
Q2aad: Kharashaadka Xafiiska Hantidhowrka Guud .......................................................................................................... 23
Q3aad: Awood-u-lahaanshaha Soo-rogid Ujuurooyin .......................................................................................................... 23
Q4aad: Xisaabo Banki ................................................................................................................................................... 23

## QAYBTA VI: LA-XISAABTANKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

Q1aad: Soo-bandhigista Miisaaniyadda Soo-jeedinta ah ...................................................................................................... 24
Q2aad: Dib-u-eegista miisaaniyadda la soo jeediyey ............................................................................................................. 24
Q3aad: Ansaxinta miisaaniyadda ........................................................................................................................................ 24
Q4aad: Soo-bandhigidda qabyo-qoraalka qorshe-sanadeedda ................................................................................................ 24
Q5aad: Dib-u-eegista Qorshe-sanadeedda La Soo Jeediyey ................................................................................................. 25
Q6aad: Ansaxinta Qorshe-sanadeedda ................................................................................................................................ 25
Q7aad: Warbixinno Muddooyin Go'an Loogu Gudbinayo Guddiga Xisaabaadka Dowladda .................................................... 25
Q8aad: Gudbinta Warbixinnada Ka-soo-bixidda Hawsha iyo kuwa Maaliyadeed ........................................................................25



ORIGINAL

Q9aad: Hantidhowr Madax-bannaan oo lagu sameeyo Xafiiska Hantidhowrka Guud ....................25
Q10aad: Maqaamkiisa Hay'ad Dowladeed ahaan .................... 26

**QAYBTA VII DEMBIYADA IYO CIQAABAHA**

Q1aad: Dembiyada iyo Ciqaabaha .................... 26

**QAYBTA VIII: QODOBBO QUBANE AH**

Q1aad: Warbixinnada Hantidhowrka Guud oo laga Ilaaliyo Maxkamadeyn .................... 27
Q2aad: Hantidhowrka Guud iyo Shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud oo laga ilaaliyo in wax loo raacdo .................... .27
Q3aad: Gaarsiinta Dokumentiyo .................... 27
Q4aad: Sarreynta Sharcigan .................... 27

ORIGINAL

**HORDHAC**

**QAYBTA I QODOBKA 1 AAD**

**CINWAAN GAABAN**

SHARCIGAN WAXAA LOOGU YEERI KARAA

SHARCIGA HANTIDHOWRKA EE DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND.

**QAYBTA I QODOBKA 2 AAD**

**HADAFKA SHARCIGA**

Hadafka laga leeyahay Sharcigan waa in uu:

a) abuuro Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya kaas oo ah hay'ad dowladeed oo madax-bannaan

b) hubiyo in Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ay lahaato Hantidhowr Guud oo leh hawlaha, xasaanadaha iyo madax-bannaanida lagamamaarmaanka u ah;

c) hantidhowr madax-bannaan siiyo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo hay'adah dowladeed ee la xiriira;

d) fududeeyo mas'uuliyadaha kormeer ee Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

**QAYBTA I QODOBKA 3 AAD:**

**FASIRAAD ERAYADA**

(1) Sharcigaan dhexdiisa, haddii aaney xaaladdu si kale u dhigin fasiraadahan ayaa la raacayaa:-

i. ***"Hay'ad dowladeed"*** *waxaa soo hoos gelaya wasaarad, hay'ad madax-bannaan, qayb, xafiis, gole, guddi, machad (institution), maamul, urur Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka tirsan oo ay ka mid yihiin degmooyinka, magaalooyinka, tuulooyinka iyo maamullada kale ee degaanka ama qaybo hoose oo siyaasadeed ama dowladeed oo ka tirsan Jubbaland.*

ii. ***"Wasiirka u Habboon"*** *waxaa loola jeedaaa, marka laga hadlayo hay'ad qaanuuni ah, Wasiirka maamula hay'addaas qaanuuniga ah isaga oo adeegsanaya sharci jira.*

iii. ***"Sharci Qoondeyn"*** *waxaa loola jeedaa sharci kasta oo si waafaqsan sanad-maaliyadeed lacago u kala qoondeynaya adeegyo lagu xusey sharcigaas.*

iv. ***"Hantidhowrka Guud"*** *waxaa loola jeedaa Hantidhowrka Guud ee lagu magacaabey QODOBKA 88aad ee Dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, waxaa uu madax u yahay Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka.*

v. ***"Xeer Anshaxeed"*** *waxaa loola jeedaa bayaan faahfaahsan oo ka kooban qiyam iyo mabaa'dii, hagaya hawl-maalmeedka dhammaan shakhsiyaadka u shaqeeya ama ka wakiil ah Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka si ay uga soo bixi karaan anshaxa sarreeya ee looga baahan yahay maaddaama ay hantidhowr u yihiin dowladda.*

vi. ***"Dastuurka"*** *waxaa loola jeedaa Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.*

vii. ***"Dokumenti"*** *waxaa loola jeedaa macluumaad kasta oo keydsan waxaana ka mid ah: wax kasta oo ay wax ku qoran yihiin ama sawir leh, wax kasta oo leh calaamado, tirooyin/jaantusyo, sumado ama duleelin macno u sameynaya qof aqoon u leh in uu fasiro, iyo wax kasta oo dhawaaq, sawir ama*

ORIGINAL

*qoraal dib looga soo saari karo ama loogala soo bixi karo iyada oo la kaashanayo ama aan la kaashaneynin shey kale.*

viii. ***"Miisaaniyadda Mideysan"*** *waxaa loola jeedaa Miisaaniyad uu Baarlamaanku ansaxiyey sanad-maaliyadeed.*

ix. ***"Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka*** *iyo* ***Hay'adda Sare ee Hantidhowrka"*** *waa ereyo la isku beddelan karo oo la micne ah "Xafiiska Hantidhowrka Guud".*

x. ***"Kharashaad"*** *waxaa loola jeedaa bixinta lacagaha dowladda ee uu Baarlamaanku ku ansaxiyey sharciga qoondeynta ama Dastuurku ansaxiyey.*

xi. ***"Sanad-Maaliyadeed"*** *waxaa loola jeedaa muddo toban iyo laba bilood ah oo qiyaasaha miisaaniyadda iyo hawlgalladeeda la qorayo, lagu xisaabtamayo oo lagana soo warbixinnayo. Waxaa ay muddadaasi bilaabataa kowda Jannaayo waxaana ay ku dhammaataa 31ka Disembar ee sanadka.*

xii. ***"Hantidhowr Maaliyadeed"*** *waxaa loola jeedaa hawsha uu qabanayo Hantidhowrka Guud si uu fikir uga qaato in bayaamada maaliyadeed ee ay diyaarisey hay'ad dowladeed ay marka dhinac kasta laga eego ay ka tarjumeyso hawlqabadka maaliyadeed, xaaladda maaliyadeed, is-beddellada hantida saafiga ah ama is-beddelka ku dhacay raasamaalka, lacagta kaashka ah, iyo in hay'adda dowladeed ay raacdey shuruucda u habboon ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, saxnaanta, is-waafaqsanaanta iyo in wax u qalma lagula baxay lacagta ay maamuleysey hay'addaasi dowladeed.*

xiii. ***"Madaxa Hay'adda"*** *ama* ***"Madaxa Hay'adda Kharash-gareynta"*** *waxaa loola jeedaa Wasiirka marka laga hadlayo Wasaarad ama sarkaalka fulinta ee ugu sarreeya hay'ad, wakaalad ama maamul kasta oo dowladeed.*

xiv. ***"Wasaaradaha kale"*** *waxaa loola jeedaa dhammaan wasaaradaha kale marka laga reebo Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.*

xv. ***"Wasaaradda"*** *waxaa loola jeedaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya*

xvi. ***"Sarkaal"*** *waxaa loola jeedaa qof kasta oo u shaqeeya Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.*

xvii. ***"Xisaabaadka Dowladda"*** *waxaa ka mid ah xisaabaadka dhammaan Hay'adaha Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, dhammaan hay'adaha ay Dowladdu ku leedahay saamiga ugu badan, iyo dhammaan mashaariicda lagu maalgeliyo amaah ama deeq laga heley dal ajnebi ah ama urur caalami ah.*

xviii. ***"Hay'adaha Dowladda"*** *waxaa loola jeedaa dhammaan hay'adda Dowlad-goboleedka iyo kuwa dowladaha hoose iyo dhammaan hay'adaha ay dowladdu ay ku leedahay saamiga ugu badan. Kuwaan waxaa ka mid ah maxkamadaha, jaamacadaha iyo sharikad ama hay'ad kasta oo kale oo dowladeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.*

xix. ***"Guddiga Xisaabaadka Dowladda"*** *waxaa loola jeedaa Guddiga Xisaabaadka Dowladda ee uu dhisey Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.*

xx. ***"Maareynta Maaliyadda Dowladda"*** *waxaa loola jeedaa nidaamyada iyo habraacyada sharci iyo kuwa maamul ee hubinaya in si taabogal ah, dhaqaaleyn ku jirto oo wax-soo-saar leh looga faa'iideysto kheyraadka umadda si waafaqsan jaangooyooyinka horey loo sii qeexey,*

ORIGINAL

xxi. ***"Maaliyadaha/lacagta Dowladda"*** *waxaa loola jeedaa kheyraadka maaliyadeed ee dowlad-goboleedka waxaana ka mid ah:*

*(a) lacag/hanti maaliyadeed oo ay gacanta ku hayso ama ay xukunto Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, oo ay ka mid tahay lacag loo hayo in uu ka faa'iideysato cid aan ahayn Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya laakiin kama mid aha lacag loo hayo amaano ahaan ama iyada oo laga wakiil yahay ururada aan dowladliga ahayn ama lacag ay heleen Ganacsiyo Dowladdu Leedahay; iyo*

*(b) lacag ama hanti maaliyadeed oo uu gacanta ku hayo ama uu xukumo qof Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya wakiil uga ah gacan-ku-haynta ama xukunka lcagtaa.*

xxii. ***"Kheyraadka/xoolaha dowladda"*** *waxaa loola jeedaa dakhliyada dowladda oo ay ka mid yihiin kuwa lagu heley deeq, waqaf (bequest), amaah, hanti guurto ah iyo mid ma guurto ah, lacagaha bankiga lagu shubo, lacagaha maqan ee la sugayo iyo xuquuqaha, iyo dhammaan noocyada hantida.*

xxiii. ***"Faafin"*** *waxaa loola jeedaa (a) in dokumenti lagu faafiyo wargeys, Warfaafinta Rasmiga ah ee dowladda ama waxyaabola faafiyo si ay u wada gaarto Jubbaland; ama (b) faafinta dokumentiyadii oo la yareeyey ama la soo koobey iyada oo aan laga tegin waxyaabaha ugu muhiimsan ee ku jira dokumentiga; ama (c) in dokumentiga lagu diyaariyey meelo ay dadku ka heli karaan sida maktabadaha dadweynaha u furan ama xafiisyada hay'adaha dowladda dhexe ama keydka dokumentiyada (archives) ee hay'adahaasi; ama (d) in dokumentiga la geliyo baraha internetka ee Dowladda.*

xxiv. *"**Dakhli"*** *waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha kastamka, cashuuraha, cashuuraha badeecooyinka la soo dejiyo, cashuuraha sugan, cashuuraha kale ee waajibka ah, waxyaabaha lala wareego, kirooyinka, lacagaha bixintoodu sugnaatey, lacagaha ka yimaada iibka iyo dhammaan lacagaha kale ee ay dowladdu hesho (meel laga heleaba) kuwaas oo Baarlamaanka Dowlad-goboleedku uu awood u leeyahay in uu kala qoondeeyo, marka lagu daro lacagta laga helo dhammaan amaahaha la qaato iyo deeqaha uu hesho Dowlad-goboleedkaa Jubbaland ee Soomaaliya.*

xxv. ***"Wasaaradda u qaabilsan/Sector Minister"*** *waxaa loola jeedaa wasaaradda mas'uulka ka ah kormeerka wakaalad/ganacsi ay dowladdu leedahay.*

xxvi. ***"Wareegto Qoondeyn Dheeri ah"*** *waxaa loola jeedaa Wareegto kasta, oo hadafka laga leeyahay uu yahay in ay kaabto qoondeymo horey loogu ansaxiyey Wareegto Miisaaniyadeed.*

xxvii. ***"Shey Kharash Lagu Bixiyo"*** *waa kharashaad gaar ah oo lagu aqoonsadey kala-saarsaaridda Miisaaniyadda Mideysan.*

xxviii. ***"Hay'adaha Ay Lacagtu Ku Baxdo":*** *waxaa loola jeedaa hay'adaha, wakaalada iyo macaahidda dowladda ee bixiya alaabooyin iyo adeegyo dowladeed, oo hoos taga Wasaarad Kale ama Wasaaradda ama Hoggaamiye oo isticmaasha kharashaadka lagu sheegey Miisaaniyadda Mideysan.*

ORIGINAL

xxix. ***"Ganacsi ay Dowladdu Leedahay"*** *waxaa loola jeedaa meherad ganacsi ama hay'ad kale oo uu dhisey sharciga, kaas oo Dowlad-goboleedka Jubbaland uu leeyahay saami u oggolaanaya gacan-ku-hayntiisa, kaas oo soo saaro alaabo/badeeco ama adeegyo loogu talogaley suuqa oo hawlgalladiisana uu inta badan isagu ku maalgeliyo dakhliga soo gala. Saami u oggolaanaya gacan-ku-haynta ganacsi waxaa loola jeedaa in uu awood u leeyahay in uu adeegsado mid ka md ah awoodahan soo socda ee la xiriira siyaasadaha maaliyadeed iyo kuwa hawlgal ee ganacsiga si uu hawlihiisa uga helo faa'iidooyinka ugu badan:*

*a) magacaabidda ama xil-ka-qaadista dhammaan, badi, golaha hoggaaminta ama guddiga maamula ganacsiga;*

*b) magacaabista ama xil-ka-qaadista sarkaalka fulinta ee ugu sarreeya ganacsiga;*

*c) in uu bixiyo dhammaan, ama badi, codadka shirarka golaha agaasimayaasha ama guddiga u dhigma kaas ee maamulka ganacsigaas; ama*

*d) gacan-ku-haynta dhammaan, ama badi xuquuqaha codeynta ee shirka guud ee dhammaan xubnaha codka bixiya ee ganacsigaas.*

## QAYBTA II

## XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD IYO HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA

### QAYBTA II QODOBKA 1 aad:

### ABUURISTA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA

(1) Xafiiska Hantidhowrka Guud waa in uu ahaadaa hay'ad dowladeed oo weligeed jireysa oo lehna shaabad rasmi ah oo cid ku dacweyn karta ama lagu dacweyn karo magaceeda, oo, si ku xiran qodobbada Dastuurka, faa'iido ama dhibaato ka soo gaareyso, wax kasta oo ay sameyso, faa'iido ka hesho ama ay dhibaato ka soo gaareyso hay'ad dowladeed.
(2) Xafiiska Hantidhowrka Guud waxaa madax ka noqonaya Hantidhowrka Guud.
(3) Xafiiska Hantidhowrka Guud waa in uu ku yaallaa caasimadda Jubbaland isaga oo awooddiisuna ay gaareyso dhammaan dhulka Dowlad-goboleedka Jubbaland.

### QAYBTA II QODOBKA 2 aad

### MAGACAABISTA HANTIDHOWRKA GUUD

(1) Magacaabista Hantidhowrka Guud waxaa lagu maamulayaa QODOBKA 88aad ee Dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

(2) Magacaabista Hantidhowrka Guud waxaa soo jeedinaya Golaha Wasiirrada, waxaana ansaxinaya Baarlamaanka Dowlad-goboleedka Jubbaland.

(3) Qofka loo magacaabay ma haynayo xafiiska wax ka badan saddex-bilood inta uu sugayo ansaxinta.

(4) Marka uu soo xulayo musharaxiin loo magacaabo Hantidhowrka Guud, Golaha Wasiirradu waa in uu hubiyaa in musharax kasta:

    (a) uu yahay qof reer Jubbaland ah;

    (b) ay da'diisu ka yareyn 40 sano jir;

    (c) uu haysto shahaaddo jaamacadeed;

    (d) ay caddahay in uu leeyahay xirfadaha xisaabaadka;

    (e) uu leeyahay ugu yaraan shan (5) sano oo waayo-aragnimo ku habboon ah; iyo

    (f) ay sugan tahay aaminimadiisa.

(5) Marka la magacaabo oo uu ansaxiyo Baarlamaanka Dowlad-goboleeedka, Hantidhowrka Guud ma hayn karo xafiis siyaasadeed kumana lahaan karo door rasmi oo toos ah iyo mid aan toos ahayn hay'ad ama urur ama hawl gaar ah iyo mid xirfadeed oo Hantidhowrka Guud uu uga faa'iideysan karo ama saameyn ugu yeelan karo isaga oo adeegsanaya awoodaha ama jagada uu ka hayo Xafiiska Hantidhowrka Guud.

(6) Hantidhowrka Guud waa in uu ka haraa wixii hawlo, waajibaadyo ama maalgelinno ah oo keeni kara ama loo qaadan karo in ay iska hor imaanayaan danaha xafiiska.

(7) Hantidhowrka Guud waxaa uu noqon karaa sarkaal ka tirsan, kaashan karaa, ama ka-qaybgeli kara hawlaha ururrada xirfadlayaasha hantidhowrka ama xisaabaadka iyo hay'adaha u dejiya jaangooyooyinka kuwaas oo hawlahooda iska horimaaneynin doorarka iyo hawlgallada xafiiska hantidhowrka.

## QAYBTA II QODOBKA 3 aad

## HAWLAHA HANTIDHOWRKA GUUD

(1) Hantidhowrka Guud ee sida saxda ah loo magacaabey waa hantidhowrka dibadeed ee hay'adaha dowladda.

(2) Waa in uu/ay u madax-bannaanaadaa/taa sida uu/ay u qabanayo/neyso mas'uuliyadaha hantidowrka dibadeed ee ah baarista iyo ka-soo-warbixinta helidda, bixinta iyo gacan-ku-haynta dhammaan maaliyadaha/lacagaha dowladda iyo dhiirrigelinta dhaqaaleyn, hufnaan iyo taabalnimo ka wanaagsan sida hadda loogu isticmaalo lacagahaasi.

(3) Hantidhowrka Guud waa in uu hawlaha hantidhowrka ee Wasaaradaha, waaxaha iyo hay'adaha/wakaaladaha Dowlad-goboleedka ee aan ahayn ganacsiyo dowladddu leedahay uu u qabtaa si waafaqsan jaangooyooyinka hantidhowrka iyo xeer-anshaxeedka iyo dastuurrada Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo xeer-nidaamiye/hoosaad kasta oo kale oo ay Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya ka soo saaraan hay'adaha hantidhowrka.

(4) Hantidhowrka Guud waa in uu hawlaha hantidhowrka ee ganacsiyada dowladdu ee dowlad-goboleedka u qabtaa si waafaqsan jaangooyooyinka hantidhowrka iyo xeer-anshaxeedka Dowlad-goboleedka uu u qabtaa si waafaqsan jaangooyooyinka hantidhowrka iyo xeer-anshaxeedka iyo dastuurrada Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo xeer-nidaamiye/hoosaad kasta oo kale oo ay Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya ka soo saaraan hay'adaha hantidhowrka.

(5) Marka uu qabanayo hawlahan, Hantidhowrka Guud waa in uusan cid kale uga amar qaadan ama ku xukumin.

ORIGINAL

(6) Hantidhowrka Guud ayaa ah Madaxa iyo sarkaalka xisaabaadka ee Xafiiska Hantidhowrka Guud.

(7) Hantidhowrka Guud oo ah madaxa Hay'adda Sare ee Hantidowrka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ayaa Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jubbaland ku matalaya Hay'adaha Hantidhowrka Federaalka ee Soomaaliyeed iyo ururrada kale ee caalamiga ah ee xisaabaadka iyo hantidhowrka iyo hay'adaha jaangooyooyinka u dejiya arrimahaas.

(8) Hantidhowrka Guud waxaa uu mid kasta oo ka mid ah hawlihiisa u xil-saaran karaa shakhsiyaad kale oo ka tirsan Xafiiska, laakiin u-xilsaarashadaasi kama qaadeyso mas'uuliyadda saaran Hantidhowrka Guud iyo in lagula xisaabtamo falalka ay sameeyaan shakhsiyaadkaa uu isugu hawsha u xil-saartey.

**QAYBTA II QODOBKA 4 aad:**

**<u>MADAX-BANNAANIDA HANTIDHOWRKA GUUD</u>**

(1) Hantidhowrka Guud waa u madax-bannaan yahay sida uu u qabanayo hawlihiisa, waajibaadyadiisa iyo sida uu ugu dhaqmayo awoodihiisa.

(2) Hantidhowrka Guud waxaa uu leeyahay xasaanad lagumana qaadi karo dacwad la xiriirta sida caadiga ah ee uu u gudanayo waajibaadkiisa muddada uu xilka hayo iyo ka dib marka uu banneeyo xafiiskaba.

(3) Ka hor inta aanu gudan waajibaadyadiisa/deeda, Hantidhowrka Guud waa in uu maraa dhaar, uu dhaarinayo Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka, taas oo uu ku dhaaranayo in uu waajibaadyadiisa u gudan doono si daacadnimo iyo dhexdhexaadnimo (eex-la'aan) ku saleysan, in uu dhowrayo shuruucda Dowlad-goboleedka Jubbaland, oo uuna dhowrayo Dastuurka**.**

(4) Si uu u guto hawlaha Xafiiska, Hantidhowrka Guud, waxaa uu si waafaqsan qodobbada sharcigan, u sameyn karaa wax walba oo la gudboon waxaana uu geli karaa mucaamalaad kasta oo loogu baahan yahay hubinta in si habboon loo qabto hawlahaan. Arrimahaas waxaa ka mid ahaanaya, laakiin aaney ku koobnaan doonin:-

   (a) magacaabista shaqaalaha uu u arko in ay lagamamaarmaan u yihiin qabashada hawlahaas

   (b) abuurista iyo hirgelinta hannaan iyo siyaasado faahfaahsan oo la xiriira maareynta shaqaalaha si shaqaalahaas loogu maamulo

   (c) sameynta iyo gacan-ku-haynta hannaanadaas haddii uu yahay mid kombutar loo adeegsado ama mid waxyaabo kale loo adeegsado, loogu baahan yahay soo-uririnta, keydinta, lafagurista iyo soo-saarista maclumaadka loo baahan yahay iyo

   (d) baahinta habraacyada loo marayo qabashada hawlaha hantidhowrka.

(5) Waxaa jiraya Xeer-Anshaxeed ay ku dhaqmayaan Hantidhowrka Guud, Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud, saraakiisha iyo dhammaan shakhsiyaadka u shaqeynaya ama matalaya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee ku hawlan hawlo hantidhowr.

   (a) Si uu gacan uga geysto sumcadda Xafiiska Hantidhowrka, Hantidhowrka Guud waxaa uu hirgelin doonaa Xeer-Anshaxeedka uu dhaqangeliyey Dowlad-goboleedka Jubbaland uuna ansaxiyey Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

   (b) Xeer-Anshaxeedka iyo dhammaan dhabbe-tuseyaasha la xiriira waa la daabici doonaa waxaana la siin doonaa qof kasta oo ka tirsan Xafiiska Hantidhowrka.

   (c) Hantidhowrka Guud waa in uu dejiyaa oo uu abuuraa dhabbe-tuseyaal taabogal ah oo lagu hubinayo in loo hoggaansamo Xeer-Anshaxeedka iyo in tallaabo degdeg ah laga qaado shakhsiyaadka ku xadgudbaya Xeer-Anshaxeedka.

ORIGINAL

(6) Hal bil gudaheed magacaabista ka dib, Hantidhowrka Guud iyo Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud waa in ay Guddoomiyaha Baarlamaanka ay siiyaan la xiriirta hantida maaliyadeed iyo hawlaha kale ee: Hantidhowrka Guud iyo Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud; iyo shakhsiyaadka kale ee la xiriira ama ku xiran Hantidhowrka Guud ama Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud.

(a) Haddii uu is-beddel ku yimaado hantida maaliyadeed ama hawlahooda kale ee loo baahdo in shaaca laga qaado, Hantidhowrka Guud iyo Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud waa in ay Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka siiyaan bayaan dib loogu noqdey oo muujinaya is-beddelka yimid.

(b) Guddoomiyaha Baarlamaanka, waa in, marka uu ka soo codsado, uu nuqulka bayaankii ugu dambeeyey siiyaa guddi madax-bannaan oo lagu dhiso doono si waafaqsan Qoddobada 78 iyo 79 ee Dastuurka si ay uga soo baxaan waajibaadyadooda dastuuriga ah.

**QAYBTA II QODOBKA 5aad**

**XEER-HOOSAADYADA**

(1) Hantidhowrka Guud, waxaa marka uu u oggolaado Baarlamaanka Dowlad-goboleedka, isaga oo adeegsanaya, awoodda loo siiyey in uu soo saaro xeer-hoosaadyo dejinayaa xeer-hoosaadyo caadi ahaan dhaqangelinaya qodobbada Sharcigan iyo sidii si habbon loogu maamuli lahaa looguna hirgelin lahaa.

(2) Hantidhowrka Guud waxaa uu soo saari karaa buugaag, amarro iyo dhabbe-tuseyaal, hadba sidii loogu baahdo, si uu u sii faahfaahiyo oo uu u caddeeyo mas'uuliyadaha iyo hawlaha la xiriira dhaqangelinta Sharcigan iyo Xeer-hoosaadyada.

**QAYBTA II QODOBKA 6 aad**

**SHURUUDAHA SHAQADA EE HANTIDHOWRKA GUUD**

(1) Mushaarka, hawlgabka, gunnooyinka iyo xaaladaha kale ee shaqada ee Hantidhowrka Guud waa in uu soo sharxaa Guddiga Adeegyada Guud ee Dowladda (ama Guddiga dastuuriga ah ee u habboon), waana in lacagahaas toos looga bixiyaa Miisaaniyadda Mideysan.

**QAYBTA II QODOBKA 7 aad**

**MUDDADA XILKA**

(1) Hantidhowrka Guud waxaa uu xafiiska haynayaa muddo toddoba (7) sano ah oo xaqna uma laha in mar kale dib loo magacaabo.

**QAYBTA II QODOBKA 8 aad**

**IS-CASILAADDA HANTIDHOWRKA GUUD**

(1) Haddii ay dhacdo in Hantidhowrka Guud uu shaqada iska casilo ka hor inta uusan gaarin da'dii hawlgabka khasabka ah, waa in uu/ay ogeysiis ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda ka tegista xilka u gudbiyaa/saa Madaxweynaha si waqti ku filan uu ugu helo in si waafaqsan shuruudaha QAYBTA 5aad loo soo xulo qofkii beddeli lahaa.

## QAYBTA II QODOBKA 9 aad

## XIL-KA-QAADISTA HANTIDHOWRKA GUUD

(1) Hantidhowrka Guud waxaa xafiiska looga qaadi karaa keliya si waafaqsan qodobbada QAYBTA n.

(2) Hantidhowrka Guud waxaa xafiiska looga qaadi karaa oo keliya sababo la xiriira in uu gudan waayey hawlaha xafiiskiisa/keeda (haddii ay taasi ka dhalatey xanuun jireed ama mid maskaxeed ama sabab kale waxa ay doonto ha haaatee) ama anshax-xumo.

(3) Madaxweynaha waa in uu xilka ka qaadaa Hantidhowrka Guud haddii su'aasha la xiriirta in xafiiska laga qaado uu u soo gudbiyo Guddiga Adeegyada Guud ee Dowladda (ama Guddiga Dastuuri ah ee u habboon).

(4) Guddiga Adeegyada Guud ee Dowladda (ama Guddiga dastuuriga ah ee u habboon) waa in ay adeegsadaan shuruucda u habboon marka ay baarayaan arrinta Hantidhowrka Guud ee waafaqsan QAYBTA n.

(5) Guddiga Adeegyada Guud ee Dowladda (ama Guddiga dastuuriga ah ee u habboon) ka dib marka ay baaraan arrinta waa in ay xaqiiqooyinka uga soo baxa baaritaanka ay uga warbixiyaan Baarlamaanka Dowlad-goboleedka ayna kula taliyaan in ay tahay in Hantidhowkra Guud laga qaado xafiiska.

(6) Haddii arrinta ku saabsan in Hantidhowrka Guud laga qaado xafiiska loo gudbiyo Guddiga Adeegyada Guud ee Dowladda (ama Guddiga dastuuriga ah ee u habboon) oo warbixin ku talineysa in xafiiska laga qaado loo soo saaro si waafaqsan QAYBTA n, Madaxweynaha, isaga oo raacaya aqlabiyadda hal-dheeriga ah ee xubnaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka waxaa uu Hantidhowrka Guud ka joojinaya hawlihii uu ka hayey xafiiska.

(7) Hantidhowrka Guud waa in uu hawshiisa u hakiyaa sida ugu dhaqso badan marka uu Guddiga Adeegga Guud ee Dowladda (ama Guddiga dastuuriga ah ee u habboon) uu bilaabo baaritaanka ku saabsan arrinta la xiriirta in laga qaado xafiiska, waxaana uu ka maqnaanayaa xafiiska ilaa go'aan laga gaaro arrinta.

## QAYBTA II QODOBKA 10 aad

## KU-XIGEENKA HANTIDHOWRKA GUUD

(1) Si ku xiran iyo si waafaqsan qoddobada Sharcigan, qof ayaa loo magacaabayaa Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud, waxaana qofka loo magacaabey ama loo shaqaaleeyey hawshaa laga doonayaa in uu qabto hawlaha uu faro Hantidhowrka Guud.

(2) Marka loo magacaabo Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud, qofka loo magacaabey xilkaa waa in uu dhaariyaa Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka ka hor inta uusan qofkaas bilaabin shaqada.

(3) Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud waa in uu:

- (a) ahaadaa ku-simaha Hantidhowrka Guud marka uu xanuunsan yahay, hawsha laga hakiyo ama uu maqan yahay Hantidhowrka Guud, iyo marka xafiiskaasi uu si un u bannaan yahay;
- (b) adeegsadaa awoodaha la siiyey oo uu qabtaa hawlaha Hantidhowrka Guud marka uu maqan yahay Hantidhowrka Guud; iyo
- (c) helaa mushaar ku habboon oo u qalma jagada Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud.

(4) Fal kasta ama wax kasta oo uu sameeyo Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud isaga oo adeegsanaya awoodaha oo qabanaya hawlaha Hantidhowrka Guud waxaa ay leeyihiin raad la mid ah haddii arrimahaas uu sameyn lahaa Hantidhowrka Guud.

(5) Fal kasta ama wax kasta oo uu sharci qoran ku waajibinayo in uu sameeyo, ka hadlaya ama la xiriira Hantidhowrka Guud ayaa loo qaadanayaa in si taabogal ah loo sameeyey haddiii la sameeyo, laga hadlo ama la xiriirto Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud haddii Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud uu ku-sime ahaan u hayo xafiiska Hantidhowrka Guud.

(6) Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud, marka uu ku-sime ahaan u hayo xafiiska Hantihdowrka Guud, waxaa uu leeyahay xasaanad iyo madax-bannaani la mid ah kuwa Hantidhowrka Guud.

(7) Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud waxaa xafiiska looga qaadi karaa keliya si waafaqsan qodobbada QAYBTA 12aad ee Sharcigan, iyo habraacyada xilka looga qaadayo ama looga joojinayo ee halkaa lagu sharxay ayaa iyana u habboon Ku-xigeenka Hantidhowrka Guud.

**QAYBTA III:**

**MAAMULKA, SHAQAALAHA IYO DADKA KALE EE LOO MAGACAABAYO XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD EE DOWLAD-GOBOLEEDKA**

## QAYBTA III QODOBKA 1 aad

## MAGACAABISTA SHAQAALAHA

(1) Iyada oo ku xiran codsiga Hantidhowrka Guud, ee sheegaya tayada iyo kartida shaqaalaha uu ugu baahan yahay in si hufan loo qabto hawlaha Xafiiska Hantidhowrka Guud, Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in uu si degdeg ah u shaqaaleeyaa shaqaalahaasi.

(2) Marka laga reebo Hantidhowrka Guud, dhammaan jagooyinka shaqaalaha waa si ballaaran loo baahiyaa oo iidheh loo geliyaa, imtixaanno qoraal ah iyo wareysiyo waa in la qaadaa si loo hubiyo in la helo dad shaqada ay soo codsanayaan karti iyo aqoon u leh.

## QAYBTA III QODOBKA 2 aad

## MAQAAMKA SHAQAALAHA

(1) Shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waa in loo arkaa in ay qayb ka yihiin Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaana qabanaya dhammaan xeerarka, xeer-hoosaadyada iyo habraacyada maamulka ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

## QAYBTA III QODOBKA 3 aad

## DALACSIINTA SHAQAALAHA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda u gudbiyaa talooyin ku aaddan dalacsiinta, shaqaalaha ka tirsan xafiiskiisa/keeda ee ay tahay in ay helaan dalacaadaas oo buuxiyey shuruudihii loogu baahnaa dalacaaddaas.

(2) Qof shaqaale ah uu Hantidhowrka Guud ku taliyey in la dalacsiiyo, oo qofkaas shaqaalaha ahna buuxiyey dhammaan shuruudaha dalacsiinta, waa in aan loo diidin dalacsiinta ama in aan dalacaaddiisa si aan lagagamaarmaan ahayn loo daahin.

## QAYBTA III QODOBKA 4 aad

## XAALADDA SHAQADA IYO ARRIMO KALE OO LA XIRIIRA SHAQAALAHA

(1) Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in uu:

   (a) marka laga reebo Hantidhowrka Guud, u go’aamiyaa shuruudaha shaqada ee saraakiisha iyo shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud;

   (b) la tacaalaa arrimaha la xiriira anshaxa shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud marka uu u soo gudbiyo Hantidhowrka Guud;

   (c) la tacaalaa dhammaan arrimaha kale ee Xafiiska Hantidhowrka Guud, oo ay ka mid yihiin arrimaha la xiriira lacagaha hawlgabka, arrimaha iyo dheefaha hawlgabka, iyo arrimaha la xiriira shuruudihiisa shaqada iyo anshaxa shaqaalaha;

   (d) hubiyaa in shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud ay saxiixaan heshiis ilaalinta sirta la xiriira ee sheegaya in aaney shaaca ka qaadi doonin macluumaad ay ogaadeen inta ay gudanayaan waajibaadyadooda.

ORIGINAL

## QAYBTA III QODOBKA 5 aad

## KA-DHAAFIDDA SHURUUCDA GUDDIGA SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA

(1) Xafiiiska Hantidhowrka Guud waxaa uu soo saari karaa shuruuc iyo xeer-hoosaadyo gaar ah oo la xiriira arrimaha looga hadley qodobbada (qayb-hoosaadyada) (14), (15), (16) iyo (17).

(2) Haddii shuruucda iyo xeer-hoosaadyada uu soo saarey Xafiiska Hantidhowrka Guud uu ansaxiyo Guddiga Xisaabaadka Dowladda, markaa ka dib Hantidhowrka Guud iyo shaqaalahiisa/heeda waxaa laga dhaafi doonaa kuwa lagu maamulo shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

(3) Haddii, waqtiga ay doonto ha noqotee ay dhacdo in Guddiga Xisaabaadka Dowladdu aanu ku sii qanacsanaan in xeerarka iyo xeer-hoosaadyada ay buuxinayaan shuruudihii looga baahnaa ama aan loo hirgelin sidii loogu heshiiyey, waxaa meesha laga saari karaa ka dhaafiddi laga dhaafey in ay ku dhaqmaan xeerarka lagu maamulo shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

## QAYBTA III QODOBKA 6 aad

## SHAQAALEYSIINTA QANDARAASLAYAAL

(1) Marka uu gudanayo waajibaadkiisa, Hantidhowrka Guud waxaa uu adeegsan karaa shakhsiyaad aqoon u leh ama sharikadaha xisaabaadka ama sharikado kale oo ugu shaqeeya qandaraas lagu siiyey hawlo xaddidan kuwaas oo ay ka mid yihiin kuwa QAYBTA ka ah ee loogu baahan yahay heshiisyo lala leeyahay ururro caalami ah, laakiin dhammaan fikiradaha hantidhowrka ee ay bixiyaan waxaa ay ahaan doonaan kuwo uu bixiyey Hantidhowrka Guud.

## QAYBTA III QODOBKA 7 aad

## QANDARAASYO LALA GALO SHARIKADAHA XISAABAADKA,

## HANTIDHOWRKA IYO KUWA KALE EE ADEEGYADA XIRFADEED

(1) Awoodda qandaraas lagula gelayo sharikadaha xisaabaadka ama kuwa hantidhowrka ama kuwa kale ee adeegyada xirfadeed si ay u bixiyaan adeegyo hantidhowr dibadda ka ah hay'adda, ay u sameeyaan qiimeyn, oo ay dib-u-eegis ugu sameeyaan barnaamijyada iyo mashaariicda hay'adaha dowladda waa in uu si buuxda u lahaadaa Hantidhowrka Guud.

**(2)** Sharikadaha xisaabaadka ee adeegyada guud bixiya waa ka mamnuuc in ay adeegyo hantidhowr siiyaan hay'adaha dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya marka laga reebo in ay u bixiyaan si waafaqsan sharcigan.

## QAYBTA III QODOBKA 8 aad

## DHABBE-TUSEYAASHA QANDARAAS-BIXINTA

(1) Marka uu qandaraas la gelayo khubarro farsamo ama xisaabiyeyaal ka tirsan sharikado gaar ah sida lagu sharxay QAYBTA ka horreyse middan ee Sharcigan, Hantidhowrka Guud waa in uu qaadaa habraacyadan soo socda:

- (a) shaqaaleyntooda iyo dejinta shuruudaha hawlgalka iyo lacagta ay qaadayaan oo qoraal ah;
- (b) qandaraaska oo uu ku bixiyo qaab qoraal ah;
- (c) go'aaminta qaabka shaqada loo baahan yahay in loo qabto;
- (d) ansaxinta qorshaha shaqada iyo habraacyada u habboon (baaxadda iyo habka loo qabanayo) shaqada;
- (e) dib-u-eegista dokumentiyada loogu baahan yahay hantidhowrka iyo warbixinnada uu diyaariyey qandaraaslaha; iyo
- (f) codsashada shaqo dheeri ah sida loogu baahdo iyo goorta loo baahdo.

ORIGINAL

**QAYBTA III QODOBKA 9 aad**

**WAAJIBAADYADA IYO WAXYAABAHA**

**LAGA DOONAYO QANDARAASLAYAASHA**

(1) Marka ay fulinayaan waajibyaadyada laga doonayo, shakhsiyaadka qandraaska kula shaqeynaya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland, waa in ay raacaan jaangooyooyinka hantidhowrka ee uu adeegsigoodu ansaxiyey Hantidhowrka Guud waxaana laga doonayaa in ay waafaqsanaadaan siyaasadaha iyo habraacyada xafiiskiisa/keeda.

**QAYBTA III QODOBKA 10 aad**

**MUDDADA AY JIRAYAAN QANDARAASYADA**

**LA SIINAYO SHARIKAADKA XISAABAADKA**

(1) Sharikadaha xisaabaadka ama sharikadaha ee ay is-leeyihiin waa in aaney qandaraas hantidhowrnimo ka wada qaadan isla hay'ad wax ka badan afar sano oo isku xiga.

**QAYBTA III QODOBKA 11 aad**

**ADEEGYADA AAN LOO OGGOLEYN IN AY**

**BIXIYAAN SHARIKAADKA XISAABAADKA**

(1) Sharikaadka xisaabaadka ama kuwa ay is-leeyihiin waa in aan adeegyo kale, oo ay ka mid yihiin talo-siin cashuureed ama mid xisaabaad ama adeegyada la-talinta maareynta, siinin mid ka mid ah hay'adaha Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya kuwaas oo ay islamarkaana ay ugu shaqeeyaan hantidhowr dibadeed ahaan.

**QAYBTA III QODOBKA 12 aad**

**AWOODDA LA SIINAYO SHARIKAADKA XISAABAADKA**

(1) Shakhsiyaadka ama sharikaadka qaab qandaraas ah ula shaqeynaya Hantidhowrka Guud waa in ay waajibaadyada uu qandaraasku saarayo uga soo baxaan si xirfadlenimo ay ku dheehan tahay, iyaga oo dhowraya shuruudaha ku xusan qandaraaskooda una dhaqmaya si waafaqsan xeer-anshaxeedka iyo aadaabta xirfaddooda.

(2) Shakhsiyaadka ama sharikaadka qaab qandaraas ula shaqeynaya Hantidhowrka Guud waa in loo qaataa in ay leeyihiin awood iyo mas'uuliyado la mid ah kuwa Hantidhowrka Guud iyo shaqaalihiisa/heed marka laga hadlayo helidda macluumaadka, u soo saaridda dokumentiyada, iyo baarista xisaabaanka bankiyada iyo shaac-uga-qaadista macluumaadka.

**QAYBTA III QODOBKA 13 aad**

**U-SOO-CELINTA KHARASHAADKA KU BAXAY**

**ADEEGYADA CID KALE QANDARAAS LAGU SIIYEY**

(1) Marka Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya uu qandaraasyo la galo sharikaad xisaabaadka ka shaqeeya si ay uga soo baxaan shuruudo ay dad uga baahan yihiin deeq-bixiyeyaal, ururro caalami ah ama hay'ado ajnebi ah, ujuurooyinka adeegyadaas qandaraaska lagu bixiyey waa in ay bixiyaan hay'adda loo sameynayo adeegyadaas.

## QAYBTA III   QODOBKA 14 aad

## UJUUROOYIN UU QAADO HANTIDHOWRKA GUUD

## SI UU U HELO KHARASHKA KU BAXA HAWSHIISA

(1) Marka Hantidhowrka Guud uu adeegyo siiyo hay'ado aan ka ahayn hay'adaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka ama mashaariic ajnebi maalgeliyo, waxaa uu ku soo dallici karaa ujuuro uu ku soo ceshanayo kharashkii ka baxay waana in ujuurada noocaas ahi lagu shubaa Xisaabta Keliya ee Khasnadda (TSA) ee hoos timaadda Sanduuqa Miisaaniyadda Mideysan ee Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

## QAYBTA IV

## HANTIDHOWR KU-SAMEYN IYO KA-SOO-WARBIXIN

## QAYBTA IV   QODOBKA 1 aad

## HANTIDHOWR KU-SAMEYNTA HAY'ADAHA DOWLADDA

## EE DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA

(1) Hantidhowrka Guud, isaga oo ah madaxa Hay'adda Ugu Sarreysa ee Hantidhowr ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, waa hantidhowraha dibadeed ee dhammaan hantida umadda, waxaana uu mas'uul ka yahay oo uu awood u leeyahay in uu sameeyo baaris iyo hantidhowr maaliyadeed, sida loo raacayo sharciga, hawlqabadka iyo hatidhowr kaleba, oo uu warbixinnadiisa u soo gudbiyo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka isaga oo nuqul siinaya Madaxweynaha, iyo Wasiirka ka ma'suulka ah maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

(2) Marka uu sameynayo hantidhowrada, Hantidhowrka Guud waa in sida la qumanaata ee lagamamaarmaanka ah u baaraa xisaabaha Madaxda Hay'adaha Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, kuwa ugu waaweyn ee hela dakhliga iyo dhammaan kuwa shakhsiyaadka lagu aaminey ururinta, qaadidda, haynta, soo-saarista, iibinta, wareejinta ama geynta boollooyinka, waraaqaha balanqaadka hantida (*securities*), bakhaarro ama hanti kale oo dowladeed iyo saraakiisha kale ee uu u arko in ay lagagamamaarmaan tahay.

(3) Marka uu sameynayo hanti-dhowrkiisa/keeda, Hantidhorka Guud waa n uu xaqiijiyaa in:

- (a) qoraallada xisaabaadka si sax ah oo habboon loo sameeyey;
- (b) xeerarka, habraacyada iyo kantaroollada gudaha ahi ay ku filan yihiin xaqiijinta in si hufan loo kontaroolo, daraaseynta, soo-ururinta iyo si habboon u-qoondeynta dakhliyada;
- (c) dhammaan lacagta la isticmaaley ee lagu dallacay xisaab la qoondeeyey lagu bixiyey ujeeddadii ama ujeeddooyinkii Barlamaanka Dowlad-goboleedku ugu talogaley iyo iyada oo la tixgelinayo hubinta kantarool gudaha hay'adda ka shaqeeya oo taagobal ah; iyo
- (d) kantaroollada gudaha, xeerar iyo habraacyo la dejiyey ee la adeegsadey ay ku filan yihiin ilaalinta kantaroolidda bakhaarada keydka iyo hantida kale ee dowladda.

(4) Marka uu sameynayo hantidhowrrada waxqabadka ama hantidhowrada sida lacagta loogu bixiyey wax u qalma, Hantidhowrka Guud waa in uu baaraa ilaa xadka Hay'adi ay kheyraadkeeda u adeegsatey oo ay hawliheedana ugu qabatey si dhaqaaleyn ay ku dheehan tahay, hufan oo taabogal ah.

(5) Marka Hantidhowrka Guud uu bixinayo warbixin ay ku jiraan macluumaad sir ah waa in:

- (a) uu  tixgelin ku habboon siiyaa sirnimada macluumaadka; waxaana
- (b) marka uu la tashado Madaxweynaha, Wasiirka Maaliyadda iyo Wasiirka mas'uulka ka ah macluumaadkaas, xaddidi karaa warbixinta hantidowrka ee macluumaadka noocaas ah ilaa xadka lagamamaarmaanka ah.

(6) Faqradda (5) kama hor-istaageyso Hantidhowrka Guud in uu shaaca ka qaado wax uu ogaadey in ay yihiin kharashaad aan la ansaxin ama khalad ah, ama hab-dhaqan kasta oo kale oo khaldan ama dembi ah oo la xiriira arrimaha maaliyadda ee wasaaradda mas'uulka ka ah, laakiin shaac-ka-qaadis kasta oo noocaas ah waxaa laga yaabaa in aaney ku jirin xaqiiqooyin shaac-ka-qaadistoodu ay dhibaateyneyaan danaha dowlad-goboleedka.

**QAYBTA IV QODOBKA 2 aad**
**BAARISTA KHAYAANNO**

(1) Marka, iyaga oo ku dhex jira sameynta hantidhowr maaliyadeed, mid ku-dhaqan shuruuc ama mid hawlqabad, shaqaale ka tirsan Xafiiska Hantidhowrka Guud, ama hantidhowro uu si waafaqsan Sharcigan loo magacaabey, ay ogaadaan wax ay aaminsan yihiin in ay yihiin khayaanno iyo ama musuq-maasuq lagu kacay, waa in ay islamarkiiba wargaarsiiyaan Hantidhowrka Guud si uu uga qaado tallaabada ku habboon.

(2) Marka ay sameeyaan hantidhowro ama baaritaanno gaar ah oo hadafkoodu yahay hubsashada in ay dhaceen wax-is-dabamarin, khayaamo ama musuqmaasuq, haddii uu hubiyo in caddeyn dad ku filan oo keeni karta in la sameeyo baaritaan fal-dembiyeed iyo dacwad-ku-soo-oogid, waa in ay ka codsadaan Hantidhowrka Guud in uu arrinta u gudbiyo Booliska iyo hay'adaha garsoorka ee u habboon.

**QAYBTA IV QODOBKA 3 aad**

**WARBIXINNO SANADEED**

(1) Wasiirka Maaliyadda waa in uu, muddo afar biood gudahood ah oo ka bilaabata dhammaadka sanad-maaliyadeed kasta, ku diyaariyaa, saxiixaa oo uu Hantidhowrka Guud u gudbiyaa xisaabaadka mideysan ee dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

(2) Madaxda Hay'adaha Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya waa in ay, muddo saddex-bilood gudahood ah oo ka bilaabata dhammaadka sanad-maaliyadeedka, ku diyaariyaan, saxiixaan ayna Hantidhowrka Guud u gudbiyaan xisaabaadka dowladda ee Hay'adaha Kharash-gareynta (Hay'adaha Dowladda).

(3) Ku-dhaqmid la'aanta faqradaha (1) iyo (2) ee QAYBTA n, waa dembi marka qof lagu helo uu ka dhalanayo ganaax aan ka badneyn **5,000 $**(Saddex kun oo Dollar) oo laga qaado qofka mas'uulka ka ah kaas oo sidoo kale ay tahay in laga saaro shaqada xafiiska.

(4) Hantidhowrka Guud waa in uu ugu yaraan sanadkii mar laakiin ugu dambeyn afar-bilood ka dib marka uu xisaabaadka dowladda ka helo Wasiirka Maaliyadda iyo Madaxda Hay'adaha Kharash-gareynta (dowlada), ka soo warbixiyaa natiijooyinka hawsha hantidhowrka ee xafiiskiisa/keeda.

(5) Hantidhowrka Guud waa in uu bixiyaa fikirkiisa ku aaddan runnimada iyo xaqnimada xisaabaadka mideysan iyo mid kasta oo ka mid ah xisaabaadka dowladda goonideeda.

(6) Hantidhowrka Guud waa in uu warbixintiisa ku daraa waxyaabahan soo socda:-

- (a) waxyaabo mug leh oo laga ogaadey iyo talooyinka laga bixiyey fal kasta ama dayacaad kasta oo uu sameeyey sarkaal taas oo la xiriirta saxnaanta, is-waafaqsanaanta iyo in wax u qalma lagula baxay lacagta oo lacagta ummadda lagu maamuley;
- (b) nusqaamo kasta oo la ogaadey in ay ku jiraan hannaanka kantaroolka gudaha ee mid kasta oo ka mid ah Hay'adaha Kharash-gareynta (Hay'adaha Dowladda);
- (c) faahfaahinta qoraallada muhiimka ah ee aan la sameynin ama xeerarka iyo habraacyada la adeegsadey ee ahaa ama ah kuwo aan ku filneyn ilaalinta iyo kantaroolidda hantida dowladda;
- (d) lacag kasta oo loo bixiyey iyada oo aan la tixgelin dhaqaaleynta hantida ama hufnaanta;
- (e) jawaabaha iyo sharaxaadaha uu Wasiirka Maaliyadda ka bixiyey fikradaha iyo arrimaha uu soo qaadey Hantidhowrka ee ku saabsan xisaabaadka aan hantidhowrka lagu sameyn; iyo

(f) ilaa xadka talooyinka ku jirey warbixinnada Guddiga Xisaabaadka Dowladda ay hirgeliyeen Madaxda Hay'adaha Kharashaadka-bixiya (Hay'adaha Dowladda).

## QAYBTA IV QODOBKA 4 aad

## WARBIXINNO GAAR AH

(1) Hantidhowrka Guud waxaa uu go'aansan karaa in uu sameeyo hantidhowr gaar ah iyo in si isaga uu go'aankeedu leeyahay uga diyaariyo warbixinno gaar ah.

(2) Hantidhowrka Guud waxaa uu warbixinno gaar ah u gudbin karaa Baarlamaanka Dowlad-goboleedka ama waxaa warbixinta hawsha noocaas ah uu ku dari karaa warbixin-sanadeeddiisa.

## QAYBTA IV QODOBKA 5 aad

## U-GUDBINTA WARBIXINNADA EE AF-HAYEENKA BAARLAMAANKA DOWLAD-GOBOLEEDKA

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu warbixinnadiisa/deeda si toos ah ugu gudbiyaa Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka isaga oo nuqullo siinaya Madaxweynaha Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, Wasiirka ka mas'uulka ah maaliyadda, iyo Madaxda Hay'adaha Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Warbixinnada waxaa ka mid ahaan kara faallooyin Madaxda Hay'adaha Kharash-gareynta (Hay'adaha Dowladda) ee u habboon, laakiin Hantidhowrka Guud ayaa awood buuxda u leh go'aamada la xiriira tafaftirka warbixinnadiisa/deeda.

## QAYBTA IV QODOBKA 6 aad

## SOO-HORDHIGGIDDA WARBIXINNADA EE BAARLAMAANKA DOWLAD-GOBOLEEDKA

(1) Guddoomiyaha Baarlamanku waa in uu warbixinnada hantidhowrka horgeeyaa Baarlamaanka Dowlad-goboleedka muddo shan maalmood ah oo ka bilaabata marka uu helo warbixinnada, waa marka Baarlamaanku uu kal-fadhigiisu socdo. Haddii ay dhacdo in warbixin hantidhowr loo soo gudbiyo Guddoomiyaha Baarlamaanka iyada oo aan Baarlamaanku kalfadhigiisu socon, markaa Guddoomiyaha Baarlamaanka waxaa uu warbixinta ku gudbinayaa laba toddobaad gudahood marka uu dib isu soo noqdo Baarlamaanka.

## QAYBTA IV QODOBKA 7 aad

## WARBIXINNADA OO AH DOKUMENTIYO AY DADWEYNUHU HELI KARAAN

(1) Dhammaan warbixinnada uu soo saaro Hantidhowrka Guud waa in loo tixgeliyaa in ay yihiin dokumentiyo dadweynuhu heli karaan oo lagu daabacaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda lana gaarsiiyaa Baarlamaanka Dowlad-goboleedka iyo dadweynaha muddo bil gudaheeda ah oo ka bilaabata marka la dhammeystiro warbixinta.

(2) Maaddaama ay yihiin dokumentiyo dadweyne waa in laga dhigaa kuwo ay dadweynuhu ku heli karaan lacagta ugu yar oo loogu talogaley in lagu soo celiyo kharashkii galey.

(3) Hantidhowrka Guud waxaa uu warbixinnadiisa ka dhigi karaa kuwo ay dadweynuhu qaab elektaroonik ah uga heli karaa internet-ka.

(4) Hantidhowrka Guud waa in uu nuqullo ka mid ah warbixinnadiisa la baahiyey siiyaa mas'uulka arkiifiyaha (keydka dokumentiyada) dowlad-goboleedka, dhammaan maktabadaha dadweynaha iyo kuwa Jaamacadaha ee ku dhex yaalla Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya, iyo sidoo kale warbaahinta.



ORIGINAL

(5) Hantidhowrka Guud ama shaqaalihiisa/heeda waxaa ay faallooyin iyo wareysiyo siin karaan wargeysyada iyo warbaahinta kale kuwaas oo la xiriira mowduuca ay ku saabsan yihiin mid kasta oo ka mid ah warbixinnada hantidhowrka ee la baahiyey.

**QAYBTA IV QODOBKA 8 aad**

**DIB-U-EEGISTA UU GUDDIGA XISAABAADKA DOWLADDA UU KU SAMEEYO DHAMMAAN WARBIXINNADA HANTIDHOWRKA**

(1) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in uu daraaseeyaa oo ka doodaa warbixin kasta oo ka timaadda Hantidhowrka Guud oo la soo hordhigo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

(2) Daraasweyntaa waxaa ka mid ahaan kara su'aalo la weydiiyo Madaxda Hay'adaha Kharash-gareynta (Hay'adaha Dowladda), in sharaxaad la weydiiyo Hantidhowrka Guud iyo in jawaabo rasmi ah laga helo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

(3) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in uu bixiyaa talooyin ku saleysan daraaseyntiisa waana in uu korjoogteeyaa hirgelintooda. Tallaabooyinka uu qaadayo Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in ay hagaan xeer-nidaamiyeyaasha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

(4) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in uu lahaadaa awood uu ugu yeero Madaxda Hay'adaha Dowladda iyo saraakiisha kale ee dowladda ee ay tahay in wax laga weydiiyo waxyaabaha uu soo ogaadey Hantidhowrka Guud. Wasiirrada, la-taliyeyaashooda, khubarro kale iyo kooxo ka tirsan bulshada rayidka ah ayaa sidoo kale loo yeeri karaa si ay u horyimaadaan Guddiga Xisaabaadka Dowladda marka uu daraaseynayo warbixinnada Hantidhowrka Guud.

(5) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waxaa ay caadi ahaan dhegeysiyadiisu ahaanayaan kuwo u dhaca si aan qarsoodi ahayn oo dadweynaha u furan.

(6) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in dhammaan dib-u-eegis kasta oo ay ku sameyneyso mid kasta oo ka mid ah warbixinnada Hantidhowrka Guud ay warbixin u diyaarisaa Baarlamaanka Dowlad-goboleedka, warbixintaas oo ay ku jiraan faallo iyo talooyin.

(7) Baarlamaanka Dowlad-goboleedka waa in uu ka doodaa mid kasta oo ka mid ah warbixinnada Guddiga Xisaabaadka Dowladda. Dhammaadka dood kasta Baarlamaanka Dowlad-goboleedku waa in uu cod u qaadaa ansaxinta ama diididda warbixinta.

**QAYBTA IV QODOBKA 9 aad**

**JAANGOOYOOYINKA HANTIDHOWRKA**

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu go'aamiyaa jaangooyooyinka hantidhowr ee ay tahay in la adeegsado waxaana uu sameyn karaa jaangooyooyin hantidhowr iyo xeer-anshaxeed u gaar ah hantidhowrrada uu sameeyo xafiiskiisa/keeda.

(2) Marka la hirgelinayo faqradda (1) ee kore waa in la tixgeliyaa arrimahan soo socda:

   (a) Marka hantidhowr lagu sameynayo wasaaradaha, waaxaha, wakaaladaha/hay'adaha iyo ganacsiyada dowladdu leedahay waa in la adeegsadaa jaangooyooyinka guud ahaan la isku raacsan yahay ee hantidhowrka dowladeed ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo dastuurrada Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya iyo xeer-hoosaad kasta oo kale oo ay soo saareen hay'adaha hantidhowrka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya.

   (b) Marka la sameynayo hantidhowro maaliyad-siin ama loo sameynaya ururrada deeq-bixiyeyaasha ah waxaa la adeegsan karaa jaangooyooyinka caadiga ah ee ay iskuraacsan yihiin ururrada ayaa la adeegsan karaa.

## QAYBTA IV QODOBKA 10 aad

## HELIDDA SARAAKIIISHA, DOKUMENTIYADA IYO DADKA KALE IYO GELIDDA XAFIISYADA, IYO DHISMAYAASHA

(1) Hantidhowrka Guud iyo shaqaalihiisa/heeda waa in ay si buuxda u heli karaan dadka, dokumentiyada, kombuyutarrada iyo nidaamyada kale ee macluumaadka, iyo hantida uu Hantidhowrka Guud u arko in ay lagamamaarmaan u yihiin in si habboon uu u guto hawlihiisa/heeda, waajibaadyadiisa/deeda iyo awoodihiisa/heeda.

## QAYBTA IV QODOBKA 11 aad

## WAAJIBAADKA HAY'ADAHA DOWLADDA KA SAARAN IN AY BIXIYAAN MACLUUMAADKA LOOGA BAAHAN YAHAY

(1) Madaxa Hay'adda Kharash-gareynta (Hay'adda Dowladda) waa in uu hubiyaa in Hantidhowrka Guud uu dhammaan waqtiyada macquulka ah ku heli karo dokumentiyada hay'adda ee loogu baahan yahay gudashada hawlaha iyo waajibaayada iyo adeegsashada awoodaha Hantidhowrka Guud.

(2) Shaqaalaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waa in la siiyaa meel macquul ah, ku haboon oo ammaan ah oo ay ku qabsadaan hawshooda. Madaxa Hay'adda Kharash-gareynta (Hay'adda Dowladda) iyo/ama maamulka hay'ad dowladeed waa uu sidoo kale Hantidhowrka Guud muddo ka dibba ama marka ay muddo la isku ogyahay ka soo wareegtaba siiyaa xisaabaadka hay'adda dowladeed ee uu cayimey Hantidhowrka Guud.

## QAYBTA IV QODOBKA 12 aad

## HELIDDA WARBIXINNADA HANTIDHOWRKA GUDAHA

(1) Hantidhowrada gudaha ee Hay'ad Kasta oo Kharash-gareyn (Hay'adaha Dowladda) waxaa ku waajib ah, taas oo ah aadaabta mihnadda, in ay nuqul ka mid ah warbixinnada kama-dambeysta ah ee hantidhowrka gudaha u soo gudbiyaan Hantidhowrka Guud.

## QAYBTA IV QODOBKA 13 aad

## AWOODO MACLUUMAAD-URURIN

(1) Hawlaha iyo awoodaha Hantidhowrka Guud lagu siiyey Qaybtan waxaa ay dheeri ka yihiin hawlaha iyo awoodaha Hantidhowrka Guud lagu siiyey shuruucda kale ee qoran.

(2) Hantidhowrka Guud waxaa, isaga oo qoraal ku sheegaya, uu qof u oggolaan karaa ("qofka loo oggolaadey") in uu qabto hawlaha lagu sheegey Qaybtan.

(3) Iyada oo ujeeddada uu ka leeyahay ay tahay mid hantidhowr, Hantidhowrka Guud waxaa, isaga oo qoraal ku sheegaya, fari karaa qof in uu qabto dhammaan ama qaar ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- (a) in uu Hantidhowrka Guud siiyo macluumaad ama sharaxaad kasta oo uu Hantidhowrka Guud u baahan yahay;
- (b) in uu hortago oo uu caddeyn siiyo Hantidhowrka Guud ama shakhsi loo oggolaadey;
- (c) in uu Hantidhowrka Guud u keeno dokumentiyo kasta oo uu hayo ama qofkaasi kantaroolkiisu hayo.

(4) Hantidhowrka Guud waxaa uu amar ku bixin karaa in:

- (a) macluumaadka, sharraxaadaha ama jawaabaha loo bixiyo hadal ahaan ama qoraal ahaan (hadba sida uu Hantidhowrka Guud faro); iyo
- (b) macluumaadka, sharraxaadaha ama jawaabaha su'aalaha ay ahaadaan kuwo la xaqiijiyo ama lagu dhaarto ama la adkeeyo/akido in macluumaadka ama caddeynta uu qofku bixinayo ay tahay mid run ah.

(5) Hantidhowrka Guud ama qofka loo oggolaadey ayaa maamuli kara dhaarta ama akidaadda/adkeynta runnimada hadalka ee Qaybtan tilmaameyso.

(6) Qofka ay faqradda (1) ku waajibisey in uu meel tago waxaa uu xaq u leeyahay in la siiyo kharashaadka uu Hantidhowrka Guud u arko in uu macquul yahay.

**QAYBTA IV QODOBKA 14 aad**

**<u>HELIDDA XISAABAADKA, MACLUUMAADKA, LACAGTA IYO HANTIDA</u>**

(1) Iyada oo ujeeddada laga leeyahay ay tahay mid hantidhowr, ayaa Hantidhowrka Guud, ama qofka uu u oggolaadey, waxaa uu xaq u leeyahay in uu si buuxda oo xor uu u yahay u heli karo waqtiyo macquul ah:

(a) dhammaan xisaabaadka, macluumaadka, dokumentiyada, nidaamyada iyo diiwaannada uu Hantidhowrka Guud u arko in ay u habboon yihiin hantidhowrka; ama

(b) lacagta dowladda ama lacag kale; ama

(c) dhammaan macluumaadka laga soo saaro ama lagu hayo nidaamyada kombuyutarrada ku dhisan; ama

(d) hanti dowladeed ama hanti kale oo gacanta ugu jirta qof oo Hantidhowrka Guud ama qof oggolaansho u haysta uu nuqullo ka sameyn karo ama uu wax ka soo qaadan karo mid kasta oo ka mid ah xisaabaadka, macluumaadka, dokumentiyada iyo diiwaannada.

(2) Si waafaqsan faqradda (1), Hantidhowrka Guud waxa uu fari karaa in la baaro, ama wax laga soo qaado, wax walba oo ay hayso cidda hantidhowrka lagu sameynayo ama xafiis qof kasta, iyada oo aan wax ujuuro ah laga bixin sameynta arrintaas.

(3) Si waafaqsan faqradda (6), Hantidhowrka Guud ama qofka loo oggolaadey waxaa, ay dhammaan waqtiyada macquulka ah, geli karaan oo ay ku sugnaan karan dhisme kasta si ay u adeegsadaan awoodaha lagu siiyey QAYBTA n.

(4) Qofka iska-hortaaga Hantidhowrka Guud ama qofka loo oggolaadey in uu dhismayaal u galo si waafaqsan QAYBTA n waxaa uu galey dembi waxaana lagu xukumayaa ganaax dembi fudud.

(5) Haddii qof loo oggolaadey uu soo galo, ama uu soo jeediyo in uu galo, dhismayaasha looga hadley QAYBTA n, qofka ku jira dhismayaashaasi waa in uu qofka loo oggolaadey gelitaanka uu siiyo dhammaan tas-hiilaadka macquulka ah si uu awoodahaa lagu siiyey qaybta n uu si taabogal ah ugu adeegsado.

(6) Qofka oggolaanshaha haysta xaq uma laha in uu galo ama ku sii sugnaado dhismayaal haddii qofkaasi oggolaanshaha haysta uu la soo bixi waayo qoraalka loogu oggolaadey gelitaanka marka uu weydiiyo qofka ku jira dhismaha in uu tuso caddeyn gelitaanka uu yahay mid loo soo fasaxay.

**QAYBTA IV QODOBKA 15 aad**

**<u>WAAJIBKA AH BIXINTA MACLUUMAADKA AYAA KA WEYN</u>**

**<u>WAAJIBAADYADA IYO XUQUUQAHA KALE</u>**

(1) Ma jiro qof laga dhaafay in uu bixiyo macluumaad ama sharaxaad, ka jawaabo su'aal ama soo saaro dokumenti si waafaqsan QAYBTA IV Qodobkiisa 13 aad iyada oo uu qofkaasi qiil ka dhiganayo in macluumaadka, sharaxaadda ama jawaabtu, ama soo-saaridda dokumentiga, laga yaabo in ay sababto in qofku uu dembi isku qiro.

(2) Qof kasta waa in uu bixiyaa macluumaad ama sharaxaad, ka jawaabaa su'aal ama soo saaraa dokumenti sida ay waajibinayso QAYBTA IV Qodobkiisa 13 aad si kasta oo uu u jiro waajib faraya sirnimo oo qofkaasi ku waajibiyey sharci kale oo qoran, qofkuna dembi lagu sheegey sharci kale looguma raacan karo in uu arrimahaan sameeyey.

(3) Haddii qof uu bixiyo macluumaad ama sharaxaad, ka jawaabo su'aalo ama soo saaro dokumenti si waafaqsan QAYBTA IV Qodobkiisa 13 aad, labadaan arrimood ee **a** iyo **b** middoodna:

(a) bixinta macluumaadka ama sharaxaadda, ka jawaabidda su'aal ama soo saaridda documenti; ama

(b) wax kasta oo si toos ah iyo si aan toos ahayn looga heley bixinta macluumaadka ama sharaxaadda, ka jawaabidda su'aal ama soo-saaridda dokumentiga;

(c) lagama dhigan karo caddeyn ka dhan ah qofkaasi oo loo adeegsado maxkamadeyn madani ah ama mid dembiyeed, marka laga reebo:

i. hawl dacwadeed oo la xiriirta dembi ay tilmaantey Qaybtan; ama

ii. hawl dacwadeed oo ku dhigan Xeerka Ciqaabta.

**QAYBTA IV QODOBKA 16 aad**

**WARGAARSIINTA WASIIRRADA**

**(1)** Hantidhowrka Guud waa in uu Wasiirka ay khuseyo ogeysiiyo dhammaan arrimaha ka soo baxa hawlaha uu qabto Hantidhowrka Guud iyo adeegsiga awoodaha Hantidhowrka Guud uu siiyey Sharcigan ama sharci kasta oo kale oo qoran oo ah, sida uu u arko Hantidhowrka Guud, oo muhiimad dad ku filan leh oo qiil u sameyneysa in sidaa la yeelo.

**QAYBTA IV QODOBKA 17 aad**

**JAWAABAHA LAGA SOO BIXIYO WARBIXINADA QABYADA AH**

(1) Gebogebada hawsha hantidhowrka, Hantidhowrka Guud waa in uu sarkaalka xisaabaadka ee u habboon ama hay'adda maamuleysa siiyaa waxbixin qabyo ah oo ay ku jiraan waxyaabihii la soo ogaadey iyo talooyinka laga bixinayo, waana in Madaxa Hay'adda Kharash-gareynta (Hay'adda Dowladeed) ama hay'adda maamuleysa ay ka soo bixiyaan jawaab qoraal ah oo ay Hantidhowrka Guud ku soo gaarsiiyaan muddo 30 maalmood gudahood ah.

**QAYBTA IV QODOBKA 18 aad**

**SHAAC-KA-QAADISTA MACLUUMAADKA**

(1) Waa in uusan qof aan oggolaansho qoraal ah ka haysan Hantidhowrka Guud, macluumaad uu ogaadey intii lagu guda jirey hawl hantidhowr uusan baahin ama shaaca uga qaadin qof kale (marka laga reebo inta uu gudanayo waajibaadkiisa/keeda ama marka si sharci ah ay maxkamad ugu waajibiso in uu sidaa sameeyo).

(2) Keliya Hantidhowrka Guud, ayaa marka uu tixgelinta ay mudan tahay siiyo danta dadka iyo waajibaadyada mihnadeed ee xirfadlaha hantidhowrka ee la xiriira sirnimada macluumaadka, go'aamin kara macluumaadka, ka baxsan warbixinta si guud loo heli karo, ee si habboon shaaca looga qaadi karo.

## QAYBTA V

## MAALIYADAHA IYO KHARASHAADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

### QAYBTA V QODOBKA 1 aad

### MAALIYADAHA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

Maaliyadaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waxaa ka mid ah:

(a) maaliyadaha uu ansaxiyey Baarlamaanka Dowlad-goboleedka; iyo

(b) deeqaha uu u ansaxiyo Wasiirka u qaabilsan maaliyadda.

### QAYBTA V QODOBKA 2 aad

### KHARASHAADKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

(1) Dhammaan lacagaha uu Baarlamaanka Dowlad-goboleedka u ansaxiyey in lagu bixiyo kharashaadka laga yaabo in uu galo Xafiiska Hantidhowrka Guud marka uu gudanayo hawlihiisa ama marka uu fulinayo ujeeddooyinka Sharcigan waa in si toos ah looga bixiyaa Sanduuqa Maaliyadda Mideysan.

### QAYBTA V QODOBKA 3 aad

### AWOOD-U-LAHAANSHAHA SOO-ROGIDDA UJUUROOYIN

(1) Hantidhowrka Guud waxaa uu ujuurooyin ku aaddan hantidhowr-ku-sameynta xisaabaadka Hay'adaha Kharash-gareynta (Hay'adaha Dowladda) ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ama ururrada calamiga ah oo aan lacag ka helin Maaliyadda Mideysan.

(2) Ujuurooyin kasta oo lagu helo si waafaqsan faqradda (1) waa in lagu shubaa sanduuqa Maaliyadda Mideysan.

### QAYBTA V QODOBKA 4 aad

### XISAABO BANKI.

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu lahaadaa xisaabaadka banki ee uu ugu baahan yahay gudashada hawlaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waana in uu ku shubaa dhammaan lacagaha laga helo Baarlamaanka si loogu xaqiijiyo ujeeddooyinka Sharcigan dhigayo.

(2) Hantidhowrka Guud waa in uu lahaadaa xisaabaadkaas banki oo u maamulaa si waafaqsan xeer-hoosaadyada loogu dejiyey wareegtada Maareynta Maaliyadda Dowladda/Maamulka.

ORIGINAL

## QAYBTA VI

## LA-XISAABTANKA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD

### QAYBTA VI QODOBKA 1 aad

### SOO-BANDHIGIDDA MIISAANIYADDA SOO-JEEDINTA AH

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu u diyaariyaa una gudbiyaa Wasiirka ka mas'uulka ah maaliyadda, miisaaniyad qabyo ah si waafaqsan Buugga Diyaarinta Miisaaniyadda, Wareegtada Miisaayad-sanadeedda iyo xeer-hoosaadyada kale ee ku jira wareegtada Maareynta Maaliyadda Dowladda/Maamulka.

### QAYBTA VI QODOBKA 2 aad

### DIB-U-EEGISTA MIISAANIYADDA LA SOO JEEDIYEY

(1) Wasiirka Maaliyadda ayaa dib-u-eegis ku sameynaya waxyaabaha uu u soo gudbiyo Hantidhowrka Guud oo kala munaaqashoonaya oo wada-hadal kala gelaya qiyaasaha si la isugu raaco miisaaniyadda soo-jeedinta ah ee la siinayo Hantidhowrka Guud oo laga mid dhigayo Miisaaniyadda Mideysan.

### QAYBTA VI QODOBKA 3 aad

### ANSAXINTA MIISAANIYADDA

(1) Ka dib marka Miisaaniyad-sanadeedda uu ansaxiyo Golaha Wasiirrada, Wasiirka ka mas'uulka ah maaliyadda ayaa Hantidhowrka Guud ogeysiinaya qoodeymaha la ansaxiyey.

(2) Hantidhowrka Guud ayaa markaa ka dib awoodi doona in uu miisaaniyadda loo qoondeeyey u kharash-gareeyo si waafaqsan xeer-hoosaadyada loogu dejiyey wareegtada Maareynta Maaliyadda Dowladda/Maamulka.

(3) Hantidhowrka Guud waa in uu xuquuq u yeeshaa in uu si toos ah ula hadlo Guddiga Xisaabaadka Dowladda ama Baarlamaanka Dowlad-goboleedka haddii ay dhacdo in miisaaniyad-sanadeedda Xafiiska Hantidhowrka Guud aan la ansaxin.

(4) Miisaaniyad-sanadeedda Xafiiska Hantidhowrka Guud waa in ay ahaataa mid qayb ka ah miisaaniyadda Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

### QAYBTA VI QODOBKA 4 aad

### SOO-BANDHIGISTA QABYO-QORAALKA QORSHE-SANADEEDKA

(1) Ugu yaraan 90 maalmood ka hor inta uusan bilaaban sanad-miisaaniyadeed kasta, Hantidhowrka Guud waa in uu diyaariyaa uuna Guddiga Xisaabaadka Dowladda u gudbiyaa qorshe sanadeed qabyo ah oo sharxaya qorshaha barnaamij-hawleedka uu ku shaqeynayo sanadkaas.

**QAYBTA VI QODOBKA 5 aad**

**DIB-U-EEGISTA MIISAANIYAD-SANADEEDDA LA SOO JEEDIYEY**

(1) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in uu qorshe-sanadeedka qabyada ah marka la soo gaarsiiyo ku sameeyaa dib-u-eegis muddo 60 maalmood gudahood ah, uuna faallooyinkiisa u gudbiyaa Hantidhowrka Guud si uu u daraaseeyo.

(2) Faallooyinka waxaa ka mid ahaan kara arrimaha mudnaanta u leh Guddiga Xisaabaadka Dowladda, Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka, guddiyada kale ee Baarlamaanka Dowlad-goboleedka iyo/ama codsiyo baaritaanno gaar ah oo aan ku jirin qorshahii hore.

**QAYBTA VI QODOBKA 6 aad**

**ANSAXINTA QORSHE-SANADEEDDA**

(1) Ka dib marka uu daraaseeyo faallooyinka ka yimid Guddiga Xisaabaadka Dowladda, Hantidhowrka Guud waa in uu dhammeystiraa qorshe-sanadeedka si uu u ansaxiyo Guddiga Xisaabaadka Dowladda.

**QAYBTA VI QODOBKA 7 aad**

**WARBIXINNO MUDDOOYIN GO'AN LOOGU GUDBINAYO GUDDIGA XISAABAADKA DOWLADDA**

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu diyaaraa oo una gudbiyaa Guddiga Xisaabaadka Dowladda, saddexdii biloodba mar, warbixin ku saabsan hawl-qabadka iyo hawlgalka Xafiiska Hantidhowrka Guud.

**QAYBTA VI QODOBKA 8 aad**

**GUDBINTA WARBIXINNO KA-SOO-BIXIDDA HAWSHA IYO KUWO MAALIYADEED**

(1) Hantidhowrka Guud waa in uu sanad walba Guddiga Xisaabaadka Dowladda u gudbiyaa nuqul ka mid ah Warbixin-sanadeedda Waxqabadka iyo Hantidhowrka Maaliyadeed ee la halmaala Xafiiska Hantidhowrka Guud.

(2) Warbixinta waa in ay ka mid ahaataa mid ku saabsan ilaa heerka uu Hantidhowrka Guud xaqiijiyey qorshe-sanadeedkiisa/keeda iyo bayaamada maaliyadeed ee hantidhowrka lagu sameeyey ee Xafiiska Hantidhowrka Guud.

**QAYBTA VI QODOBKA 9 aad**

**HANTIDHOWR MADAX-BANNAAN OO LAGU SAMEYNAYO XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD**

(1) Guddiga Xisaabaadka Dowladda waa in uu, sanad-maaliyadeed kasta, u magacaabaa hantidhowr madax-bannaan si uu hantidhowr ugu sameeyo oo uu warbixin uga soo gudbiyo bayaamada maaliyadeed, xisaabaadka iyo macluumaadka kale ee la xiriira waxqabadka Hantidhowrka Guud sanad walba. Arrinta waxaa ka mid ahaan kara in hawshaas qandaraaskaa lagu siiyo sharikad caalami ah.

(2) Ujuurada la siinayo hantidhowrka loo magacaabey si waafaqsan qaybtan waa in laga bixiyaaa maaliyadaha Hantidhowrka Guud.

## QAYBTA VI   QODOBKA 10 aad

## MAQAAMKIISA HAY'AD DOWLADEED AHAAN

(1) Si loo gaaro hadafka ah in hawsha hantidhowrku noqoto mid madax-bannaan, Hantidhowrka Guud iyo Xafiiska Hantidhowrka Guud waa in loo tixgeliyaa in ay yihiin hay'ado dowladeed ee lagu sharxay sharcigan.

(2) Hay'adda loo magacaabey hawshaa, si loo gaaro hadafyada hawshan hantidhowrka, waxaa ay leedahay awoodo la mid ah kuwa Hantidhowrka Guud.

## QAYBTA VII

## DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

## QAYBTA VII   QODOBKA 1 aad

## DEMBIYADA IYO CIQAABAHA

(1) Qofku dembi ayuu gelayaa haddii uu:

- (a) isaga oo aan haysan daliil ama qiil sharci ah, si ku-talogal ah isaga-hortaago Hantidhowrka Guud ama qof kasta oo uu u soo oggolaadey Hantidhowrka Guud in uu qabto hawlaha lagu siiyey Sharcigan gudihiisa;
- (b) isaga oo aan u haysan qiil caqligal ah, diida ama ku-guul-darreysta raacista amar kasta ama tilmaan kasta oo uu siiyo Hantidhowrka Guud;
- (c) isaga oo aan u haysan daliil ama qiil sharci ah, diida ama ku-guul-dareysta in uu Hantidhowrka Guud ama qof uu u soo oggolaadey Hantidhowrka Guud, in uu galo dhisme, helo buugta, diiwaannada, dokumentiyada xisaabaadka ama dokumentiyo kale, macluumaad haddii uu yahay elektaroonik ama haddii kale ee lagu xusey QAYBTA IV Qodobkiisa 13 aad; ama
- (d) si ku talogal ah Hantidhowrka Guud ugu soo bandhigaa dokumentiyo been ama been-abuur ah ama sheego hadal been ah isaga oo ujeedkiisu yahay in uu khayaamo ama marin-habaabiyo Hantidhowrka Guud ama qof kasta oo kale oo uu soo oggolaadey Hantidhowrka Guud.

(2) Xubin kasta oo ka tirsan Xafiiska Hantidhowrka Guud ama qof kasta oo ku shaqeynaya awoodda Hantidhworka Guud waa dembiile haddii qofkaasi uu:

- (a) weydiisto ama qaato laaluush, hadiyad, abaalmarin ama abaalgud lagu siiyo dayacaadda ama qabasho-la'aanta waajibkiisa; ama
- (b) si ku-talogal ah Hantidhowrka Guud ugu soo sheegi waaya xadgudub kasta ama wax-is-dabamarin kasta oo uu ogaado inta uu ku dhex jiro hawlihiisa/heeda hantidhowr-sameynta ah; ama
- (c) u soo gudbiyo Hantidhowrka Guud warbixin uu ogyahay in ay been tahay ama aaney jirin sabab loo aamini karo in ay run tahay; ama
- (d) si khaldan u adeegsado macluumaad uu heley isaga oo hantidhowr ugu sameynaya xisaabaad si waafaqsan Sharcigan; ama
- (e) hoos kala heshiiyo Madaxa Hay'ad Kharash-gareyn (Hay'ad Dowladeed) ama hantidhowrka gudaha ama sarkaal kale oo dowladeed inta ay wadaan hawlahooda waafaqsan Sharcigan iyaga oo kula heshiinaya in ay dayacaan wax laga rabey in ay qabtaan ama ku kacaan fal dembi ah; ama
- (f) marka dayacaaddaas ama falkaas dembiga ah uu sababo lacag ka lunta dowladda.

(3) Qofka lagu helo dembi si waafaqsan qaybtan waxaa marka lagu  helo dembigaas lagu ganaaxayaa ganaax aan ka badneyn  2,000$ ama xabsi aan ka badan Sanad, ama labadaba.

ORIGINAL

(4) Haddii qof, si kama-dambeys ah, loogu helo dembi ah in uu jebiyey sharciga ku saabsan khayaanno, lumin ama ku-takrifal xoolo dadweyne, Hantidhowrka Guud waxaa xoolahaas soo celin karaa, maxkamad awood u leh, tirada lacagta la khayaamey, la lumiyey ama lagu takri-faley sidii in ay tahay deyn ka maqan Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

## QAYBTA VIII

## QODOBBO QUBANE AH

### QAYBTA VIII QODOBKA 1 aad

### WARBIXINNADA HANTIDHOWRAHA GUUD OO LAGA ILAALIYO U ADEEGSIGA MAXKAMADEYN

(1) Dhammaan warbixinnada Hantidhowrka Guud uu u baahiyey si uu uga faa'iideysto Baarlamaanka Dowlad-goboleedka waa in loola tacaamulaa sidii in ay yihiin warbixinno Baarlamaan waana in ay helaan dhammaan mudnaanta ay leeyihiin warbixinnada Baarlamaaniga ah.

(2) Si looga fogaado shaki, waa in aan dacwad madani ah ama mid dembiyeed aan lagu qaadin Hantidhowrka Guud iyada oo loo adeegsanayo warbixinnada uu baahiyey si ay uga faa'iideysto Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

### QAYBTA VIII QODOBKA 2 aad

### HANTIDHOWRKA GUUD IYO SHAQAALAHA XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD OO LAGA ILAALIYO IN WAX LOO RAACDO

(1) Hantidhowrka Guud iyo qof kasta oo u shaqeeya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ama qof ku shaqeynaya amarro iyo tilmaamo uu bixiyeen, qofkaasi shakhsi ahaan looguma qabsan karo fal kasta ama dayacaad kasta oo la sameeyo ama dayacaad ku timid niyad-wanaag marka uu ku jiro hawlaha Xafiiska Hantidhowrka Guud.

### QAYBTA VIII QODOBKA 3 aad

### GAARSIINTA DOKUMENTIYO

(1) Ogeysiis ama qoraal kasta waxaa lagu gaarsiin karaa Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jubbland iyada oo la geeyo Xafiiska Hantidhowrka Guud, ama lagu diro boosto la diiwaangeliyey oo loo diro Xafiiska Hantidhowrka Guud.

### QAYBTA VIII QODOBKA 4 aad

### SARREYNTA SHARCIGAN

(1) Marka laga soo tago jiritaanka sharci kasta oo ka soo horjeeda, qoddobada Sharcigan ayaa sarreynaya. Sharci kasta oo ka so horjeeda Sharcigan waxbaa laga beddelayaa si uuu waafaqo qodobbada Sharcigan.

(2) Hantidhowrka Guud waa in uu xaq u yeeshaa dib-u-eegista iyo faallo ka bixinta Hindise-sharciyeed kasta oo saameyn ku leh xafiiskiisa/keeda waana in marka uu sidaa sameynayo faallooinkiisa/keeda qoraal ugu gudbiyaa Wasiirka mas'uulka ka ah keenista Hindise-sharciyeedkaas iyo guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka kaas oo u sii gudbinaya Baarlamaanka Dowlad-goboleedka marka uu socdo akhriska koowaad ee hindise-sharciyeedka.

ORIGINAL